WardheerNews
NEWS FROM AFAR!

# Seygii Saaqidka ahaa (Qaybtii 8aad)

**W/Q: Cabdicasiis Maxamad Shidane**

**Oktoober 20, 2016**

---




Tiriboli waxaa igu qabsaday waxyaabo fara badan, sida in aan la qabsan waayay cimiladeeda isgedgeddiska badan, taas oo marna qabow daran ah, marna kuleyl xad dhaafa ah. La qabsi la'aantaasi waxey sababtay, in aan la soo dhaco xanuunno aan horay iskugu ogeyn, sida beer xanuun, kelliyo xanuun, iyo xanuunno u badan kuwa ku dhaca dumarka, sida caabuqa haleela saxaaxa dumarka. Mashaqo waxey ka taaggan tahay sida aan u tagi lahaa cisbitaalka iyo sidaan isku daweyn lahaa, maxaa yeelay, ma heysto sharciga dal-ku-joogista (Iqaamad). Sida caadadu tahay kuna soo barbaaray, waan ka xishoonayey in aan iraahdo xanuunnada qaar waan qabaa, waxaana iigu wacan jahliga aan ku soo dhex koray iyo xishoodka aan xikmadeysneyn ee bulsho ahaan aan ku barbaaray. Adkeysi dheer ka dib, waxaan la soo dhacay xanuun iga haleelay kelliyaha, waana midda sababtay in aan meel cidla ah ku dhaco dharaar cad, ka dib markii aan miir beelay.

Waxaa la I geeyay cisbitaal, mana aqaan cidda I geysay oo meeshii aan ku dhacay iga qaadday. Mar dambe oo aan soo yara miirsaday, ayaa waxaa la I weydiiyay sharciga aan dalka ku joogo, si loo diiwaangaliyo warbixinta caafimaad ee xaaladdeyda la xariirta. Waxaan u sheegay takhaatiirtii iyo kalkaaliyaashii in aan sharci rasmiya ku laheyn dalka Liibiya, kuna soo galay sifo aan qeynuunka waafaqsaneyn. Halkaas waxaa ka dhashay muran iyo dood la xariirta in aan xaq u leeyahay in la I daweeyo iyo in kale. Mid ka mid ah takhaatiirtii ayaa wuxuu amar ku bixiyey in la iga saaro cisbitaalka, ama loo yeero booliska, si la ii gu wareejiyo, sababtoo ah waxaan ahay qof sharci darro ku joogta dalka, ceymis caafimaadna laheyn. Tan iyo markii


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

dooddu furantay ilaa iyo in ta booliska la igu wareejinayey, waxaa la igu duray dhawr cirbad, waxaana la igu muday Faleenbo nafaqo ah. Waa gurmadka qura ee la ii fidiyay, balse, xaq iyo xeer waan u yeelan waayay in la ii sameeyo baaritaan caafimaad oo dhammeystiran. Ciil la xariira dawladnimada ayaan dareemayay, walow aan waligayba arag waxa ey tahay dawladnimo, maxaayeelay, waxaan ku soo dhex koray bulsho kan itaalka lihi dilo kan ka liita, sharciga qura ee ka dhex shaqeeyana uu yahay shargiga howdka. Ugu danbeyntii, waxaa la ii gacan-galiyey booliska dalka, ka dib markii loo yeeray, loona sheegay in aan ahay soogalooti aan wax sharciya ku joogin dalka. Sidaas ayaan mar kale dib waxaan ugu laabtay xabsi. Waa hadda iyo ciqaab hor allaa!!



Waxaa la I geeyay xabsi ku yaalla deegaan la yiraahdo Khomus, oo aan saa'id uga fogeyn caasimadda Liibiya. Danbigaygu waa in aan sharci ku dhex laheyn Liibiya, halka aan dalkaygii uga soo cararay sabab la xariirta qofnimadeyda iyo qiimaha Insaannimo ee aan leeyahay dumar ahaan oo aan waayay. Xilliga uu ku soo beegmay xanuunkaygu waa xilliga qaboobaha. Waa xilli qof walka ku dhakan yahay aqalkiisa. La iska ma war hayo. Xabsigaan wuxuu uga geddisan yahay kii hore ee aan soo maray, in ay dadka ku xiran qoysas u badnaayeen, ilaalada xabsiguna tixgalin u hayeen wixii qoys ah. Aniga iyo saddex gabdhood oo u dhashay dalka Neyjeeriya, waxaan la kulannay jirdhil iyo canaad la xariira dumarnimadeenna. Aniga gaar ahaan waxaa ii saameynayey wiilasha iyo gabdhaha is qabay ee jaceylka iyo isku duubnaantu ka muuqatay. Mar walba oo aan dhaayaha saaro wiil iyo gabadh isku gu duuban sida ul iyo meeraxdeed, misana isdhunkanaya, ama isdhuuqaya, waxaan soo gocan jiray dhibkii aan ku qabay seygaygii I qabay ee nolasha qadhaadhka iiga dhigay. Inkaar iyo nacalad ayaan dusha kaga tuurayay, mar walba oo aan xasuusto shakhsiyaddiisa. Xabsigaba waxaa ii ga darnaa muuqaalka lammaanayaasha xabsiga ku dhex jira. Hal bil ka dib, waa nala soo daayay, annaga oo wax maxkamad ah na la saarin.

Lug ayaan ku soo galay caasimadda Tiriboli. Waxaan lugeynayey ku dhawaad labaatan iyo dhawr Kiiloo Mitir, si aan dib ugu soo laabto Tiriboli, maxaayeelay, ma heysan qarash aan markaas Taksi ku kireysto, dadna kama garanayo meesha aan ku suganahay. Qabowga dhacaya, qaaca afkayga ka baxaya, iyo sida aan u jareynayo, waa wax aaan la suuradeyn karin. Ugu danbeyntii, waxaan soo caga-dhigtay Tiriboli. Waxaan aaday gurigii ay degnaayeen gabdhihii aan la noolaa. Nasiib darro, waa ka guureen gurigii, meel ay qabteen ama u guureenna ma garan karo. Halkaas ayaan raadintoodii ka billaabay. Daris fiican oo ka warqabka ku fiicanna ma jirin,



Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

oo dadka Liibiyaanku ma ahan dad darisnimada wax ka yaqaan, damiir dadnimo iyo mid diineedna ku arki maysid. Waxaan tagay meel ay iskugu yimaadaan dhallinyarada Afrikaanta ah, si aan u helo qof yaqaanna dadka aan raadinayo. Baadi-goob dheer ka dib, waan soo helay gabdhihii iyo xaafaddii ay u guureen. Waxaan ka war helay in gabdhihii aan la noolaay mid ka mid ah badda ku dhimatay, oo doontii ay saarneyd maashootay. Runtii, cabsi iyo welwel ayaa I hareysay, waayo qof aad qol isla jiifan jirteen oo dhintay, waa wax saameynaya dareenkaaga, walow aan indhaheyga saaray dad hortayda ku dhintay, tan iyo markii aan soo galay safarkaan dheer ee dheeftiisu dhimman tahay.

Markii aan dhawr toddobaad nastay, waxaan dib u billaabay, shaqada "khaddaamadda" loo yaqaan, oo ah in aad guriga uga dhex shaqeysid qoysaska Carbeed. Waa shaqada qura ee aan qaban aqaan, Liibiyana gabadhi ka dhex heli karto. Aad ayey u adkeed shaqo ahaan, saacaduhu xad ma laheyn, xaq dhawrna ma jirin, xeer shaqaalaha I xagliyana ma ka jiro dalka. Qoys Liibiyaan ah oo hodan ah ayaan u shaqo billaabay, si aan iskugu diyaariyo safarka baddda lagu galayo, kaas oo ka dhigan tillaabadii ugu danbaysay ee aan ku macsalaameyn doono qaaradda Afrika, isbaddel nolaleedna aan ku sameyn doono. Wararka dhegoheyga ku soo dhacayay ma wacneyn, oo habeen kasta waxaan ku jiifanaynay walaac iyo walbahaar, kaas oo la xariira dad la qabqabtay iyaga oo badda sii galaya, qaar laga dhacay lacagtii yareyd ee ay muddada shaqeysanayeen, qaar doontii la degtay, iyo basaasiin meel kasta taaggan oo sheegaysa dadka bixi raba. Si walbaba, joogis ii ma laheyn Liibiya, mana ahan halka aan geediga ku furi rabay.

Wax la sugaba waqtiga bixitaanka, waxaa la soo gaaray xilligii kuleylaha iyo bad-furankii. Diyargarowgaygu ma xumeyn, oo qarash I reebi maayo, qorshe xumana I ciili mayso, haddeysan qaddari I jilaafeyn. Waxaan hishiis la galnay annaga oo koox dhallinyara ah nin shaqadiisu tahay in uu soo aruuriyo dadka bixitaanka raba, una geeya kooxaha dadka badda galiya. Waa nin Soomaali ah, balse, dhiig-miirashadu dhaqan u tahay, kana muuqato. Qarash waxaan kula hishiinnay gaaraya calaa qof kun Doollarka Maraykanka ah, iyo tiro xaddidan in uu nagu saaro doonta aan ku bixi doonno, ugu badnaan kontan qof, hasayeeshee, markii la nagu xareeyay meeshii dadka lagu aruurinayay, hishiiskii aan la soo galnay dallaalkii wuxuu noqday wax kama jiraan, oo waxaan u gacan galnay Maafiyada Liibiyaanka ah, waliba kuwa ugu halista badan. Waxaa nagu la billaabay garaac iyo baarasho. Waxey naga qaateen lacagtii aan keyd ahaan u wadannay. Daba iyo dacal kasta ayaa naga la fatashay. Mid mid ayaa na loo baartay, hablaha qaarna waaba la faraxumeeyay. Waxey noo sheegeen in aysan jiri doonin qof lacag la galeysa badda, qofkii juuq laga maqlana lagu abaalmarin doono wax uusan waligiis arag, taas oo cabsi daran na galisay.

Meesha ay kooxdani nagu heysato, waa meel aan ka fogeyn caasimadda Tiriboli. Waa guryo duqoobay oo badda saaran, halkaas ayaan ku xareysaneyn muddo laabaatan maalmood ah. Biyo iyo rooti qalleyl ah ayaan hunguri ahaan u cuni jirnay, wax kale oo quud ah ma jiraan. Lacagtii aan kula hishiinnay iyo tii dhigaalka noo aheydna wey naga wada qaateen.



Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Maalinba maalinta ay ka sii danbayso wey na madaleynayeen, oo barri ayaad baxeysiin ayey nagu oranayeen, balse, innagu quus ayaan taaggan nahay, bixitaan iska daaye, lafaheenna ayaan u cabsanaynay. Gabbal dhaca iyo waabari kasta waxaan maqleynay hirarka badda iyo neecawda ka soo haadeysa xaggeeda

La soco qeybta 9-aad.

--------------------------

W/Q; Cabdicasiis Maxamad Shidane
Email: shidane05@hotmail.com

-----------

**Sidoo kale akhri**

Qeybtii 1aad
Qeybtii 2aad
Qeybtii 3xaad
Qeybii 4aad
Qeybtii 5 aad
Qeybtii 6 xaad
Qeybtii 7 aad


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved